

**OGEYSIISKA GO'AAMINTA GUNNOOYINKA XAALADAHA DARAN
Macluumaadka Ku Saabsan Codsigaaga Daaweynta**

Taariikhda

*Magaca Ka-faa'ideystaha
Ciwaanka
Magaalada, Gobolka Zipka*

*Magaca Bixiyaha Daaweynta
Ciwaanka
Magaalada, Gobolka Zipka*

JA: *Adeegga waa la codsaday*

Ogeysiiskani wuxuu ku ogeysiinayaa in Adeegyada Caafimaadka Dhaqanka ee Degmada San Diego (Qorshaha) ay go'aamiyeen in xaaladahaagu aysan buuxin shuruudaha baahida caafimaad si aad ugu qalanto adeegyada caafimaadka maskaxda ee gaarka ah.

Taasina waxaa u wacan *Adigoo isticmaalaya luuqad cad, geli: 1. Sharaxaada shuruudaha ama tilmaamaha la isticmaalay, oo ay ku jirto tixraaca xeerarka gaarka ah iyo habraacyada oggolaanshaha qorshaha ee taageeraya tallaabada; iyo iyo, 2. Sababaha caafimaadeed ee loo gaaray go'aanka kuwaas oo la xiriira baahida caafimaad.*

Inkasta oo aanad u qalmin adeegyada caafimaadka maskaxda ee gaarka ah, waxa laga yaabaa inaad adeegyada caafimaadka maskaxda ee aan gaarka ahayn ka hesho *Qorshaha Caafimaadka ama Hay'adda ka mas'uulka ah adeegyada caafimaadka maskaxda, tusaale, daryeel-bixiyaha caafimaadka jirka. Waxaad ka wici kartaa lambarka taleefanka. Haddii ay khusayso, geli tallaabada dheeraadka ah oo uu qaaday Qorshaha si uu isugu dubarido daryeelka iyo/ama dabagalka dheeraadka ah ee uu Xubinta u baahan yahay.*

Waxaad rafcaan ka qaadan kartaa go'aankan haddii aad u malaynayso inuusan sax ahayn. Ogeysiiska macluumaadka "Xuquuqdaada" ee halkaan ku lifaaqan ayaa kuu sheegaya sida loo sameeyo. Wuxuu sidoo wax kaaga sheegayaa halka aad ka heli karto caawimada la xiriirta racfaankaaga. Tani waxay sidoo kale ka dhigan tahay caawimaad sharci oo lacag la'aan ah. Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad racfaankaaga la soo dirto macluumaad kasta ama wixii dukumentiyaha ah oo gacan ka gaysan kara kiiskaaga. Ogeysiiska macluumaadka "Xuquuqdaada" ee halkaan ku lifaaqan wuxuu ku siinayaa waqtiyo ay tahay inaad raacdo markaad codsanayso racfaan.

Waxaad codsan kartaa koobiyada lacag la'aanta lagugu siinayo ee dhammaan macluumaadka loo isticmaaley in lagu gaaro go'aankan. Waxaana ka mid ah koobiga tilmaamaha, borotokoolka, ama shuruudaha aanu u isticmaalnay inaan gaarno go'aankayaga. Si aad u cosato kuwaas, la xiriir mid ka mid ah wakaaladaha hoos ku qoran.

Qorshuhu wuxuu kaa caawin karaa su'aalo kasta oo aad ka qabto ogeysiiskan.

NOABD – Ogeysiiska Nidaamka Gaarsiinta – Diiditaanka Adeegga Caafimaadka
Maskaxda ee Gaarka ah

Degmada San Diego BHS (Qorshaha) Dib u eegis. 9/21/22

QEYBTA CINWAANKA SHIRKADA EE WARQADA

- Si aad u hesho wixii caawimaad ah oo la xiriira adeegyada BUKAAN-SOCODKA, wac Xarunta Macaamiisha ee Waxbarashada Caafimaadka iyo U doodista (CCHEA) inta u dhaxaysa 9:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo, ka wac 1-877-734-3258.
- Si aad u hesho wixii caawimaad ah oo la xiriira adeegyada BUKAAN-JIIFKA ama DEGANAANSHAHHA, wac Barnaamijka U-doodista Bukaanaada JFS inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo, kala xiriir 619-282-1134 ama 1-800-479-2233.
- Haddii ay dhibaato kaa haysato hadlida ama maqalka, fadlan wac TTY/TTD lambarka 711, inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo, si aad u hesho caawimaad.

Haddii aad hadda hesho adeegyo oo aad rabto in aad sii waddo helitaanka adeegyada inta aan go'aan kaga gaarayno racfaankaaga, waa in aad racfaan ku codsataa 10 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda warqaddan, ama ka hor taariikhda qorshahaaga caafimaadka maskaxda uu sheegay in adeegyada la joojin doono ama la dhimi doono.

Haddii aad ogaysiiskan iyo/ama dukumeentiyo kale ugu baahan tahay Qorshaha iyagoo ah qaab isgaarsiineed oo nooc kale ah sida far waaweyn, farta indhoolayaasha, ama qaab elektaroonig ah, ama, haddii aad rabto in lagaa caawiyo akhrinta qoraalka, fadlan la xiriir Khadka Helitaanka iyo Dhibaataada (ACL) adigoo wacaya 1-888-724-7240.

Haddii qorshuhu aanu kuu caawinin si aad ku qanacdo iyo/ama aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah, Xafiiska Gobolka ee Daryeelka La Maareeyo (State Medi-Cal Managed Care Ombudsman Office) ayaa kaa caawin kara wixii su'aalo ah. Waxaad wici kartaa Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo. PST, marka laga reebo maalmaha fasaxyada, 1-888-452-8609.

Ogeysiiskani ma saameynayo adeegyadaada kale ee Caafimaad/Medi-Cal.

Qeybta Saxeexa

Ku “Xaquuqahaaga”

lifaaqan:

Ogeysiiska ka Caawinta Luuqadaha

Ogeysiiska Takoorka La'aanta Ka-faa'iideystayaasha

Ogeysiiska ku lifaaq warqad kasta

NOABD – Ogeysiiska Nidaamka Gaarsiinta – Diiditaanka Adeegga Caafimaadka
Maskaxda ee Gaarka ah

Degmada San Diego BHS (Qorshaha) Dib u eegis. 9/21/22